# Internetka

Region
Östergötland

# Internetka

- **Internetka** waa qadka aduunka ugu balaaran oo kugu soo bandhigaya fursad aad ku heshid xiriir dhinaca qoraalka, dhawaaq iyo sawir.

- Qadka internetka loo isticmaalo waa **World Wide Webb** (waxaa loo soo gaabiyaa www) waa qaybta  la adeegsado marka aad boggaga internetka ka raadineysid warbixino iyo **e-mailka**.

- Ayada oo la adegsanayo boggaga internetka ayaa shaqooyin kala duwan qabsan kartaa sida golaha ama xaajooyin dhinaca xiriirka, war faahfaahinta, Adeegsiga internetka iyo wikier. World Wide webb Waxa uu soo jiray ilaa 1990-kii bilaawgiisa waana kii dadweynaha caan ka soo dhigay internetka.

# Internetka – waa caalamka qad ka dhaxeeya

- Internetka  waxa uu ku siinayaa fursado cajiib ah, oo si dhakhso ah aad ku heli kartid warbixin iyo akhbaaro iyo xiriir qoraal ah ama sawiro muuqaal ah iyo cod maqal ilaa meelkasta aduunka. Kombiyuutarada kala duwan oo aduunka gees kasta ka yaala waxay ku xiranyihin qadkan internetka, oo ku siineysaa fursad si dhakhso ah aad ku heleysid warbixino xitaa ceelka warbixinta laga keenaayo ee aad u fogtahay

- Dhinaca aad beryahan loga istcmaalo internetka  waa fursada  ayadoo guryaha la jooga ayaa aduunka xiriirineysaa ama ka shaqeyneysaa ayada oo la adegsanaayo internetka. Soo sharaxitaan dokumenti iyo isku xiriiritaan dhinaca buulshada sida buuga wajiga ***sociala medier*** , tusaale war faahfaahiyaasha shaqsiyeed,  golaha buushada sida *Facebook* ama sawirada aad qaybisid iyo filimaanta dhinaca *Youtube* ama *Flickr*. Maanta waxaa istcmaala golaha isku xiriiriya buulshada shirkadaha iyo ururoda badankood si ey internetka ugala xiriiran macaamiishooda mustaqbalka, maadaama waa hab fudud oo dhakhso badan aad ku gaarsiinaysid ujeedaada iyo aad la yeelatid wada hadal.

- Waxaa la dhahaa in internetka waxuu ku fiicanyahay waa uu na ku xumyahay – Cidii doontaa ayaa soo gelinaysa waxii ay doonaan meel kasta ay joogaan. Cid kontroollaysa warbixintaas baa iska yar. Xafiis dawladeed oo ku shaqo leh in ay kontroollto baana jirin. Warbixinta waa u furanyahay dadweynaha oo dhan si fudeyd ah waa lagu heli kara markaas waxaa loo isticmaali karaa ujeedooyin kala duwan ; hey'adaha warbixintooda, Qoraalada cilmiga aqoonta, xayeeysiis ama dacaayad.

- Sidaas daraadeed bay aad u muhiimtahay in laga digtoonsanaado qofka ka danbeeya warbixinta aad ka heshay internetka.

- Isticmaalka internetka waa lacag la'aan laakin waxaa daruuri ah in aad khad kuugu jiro kombiyuutarka. Qofka haduu rabo in uu guriga ka soo isticmaalo kombiyuurtarka waxuu u baahanyahay in uu la galo heshiis shirkadaha khdadka internetka ibiya.

# Barnaamijka akhriya bogga internetka

- (En webbläsare) barnaamijka akhriya bogga internetka waa hal barnaamij loo isticmaali in uu akhriyo boggaga internetka – *rogrogista boggaga internetka*. Barnaamijo kala duwan oo akhriya boggaga internetka, ka ugu caansan waa (Internet Explorer) oo la socda Windowska ee nidaamka kombiyuutarka (operativsystem). Tusaaloyaal kale waa Mozilla Firefox, Safari, Opera iyo Google Chrome.

- Kombiyuutarada isticmaala nidaamka Windowska (operativsystem) waxaa ku dhex jira bogg akhriye (Internet Explorer) oo la socda muuqaalkiisa waa  sida ikonada.Hadii kale waxaa ka soo shuban kartaa barnaamijka batoonka bilawga loo yaqaano (startmenyn).

# Ciwaanada boggaga

Ciwaanka bogga waa hal bogg ciwaankiisa ee gudaha internetka. Magac kale oo loo garto waa *URL* (Universal Resource Local). Waxaad ku heli kartaa goobta ciwaanka marka lagu qoro ciwanka goobta adreeska bogg akhriyaha. Bogga ciwaankiisa waxuu ka koobanyahay dhawr qaybood:

http://www.google.com

- **http:// -** oo laga soo gaabiyay **h**yper **t**ext **t**ransfer **p**rotocol.
- **www –** oo laga gaabiyay **w**orld **w**ide **w**eb.
- **Google -** domän/server, Inta badan waa iskaga mid magaca bogga. Qaybta ciwaanka oo kuu hagayey bogga aad raadinaysey ama cida booga ciwaanka iska leh.
- **Com** oo laga soo gaabiyay **Com**pany. Qaybtan waxaa loo yaqaanaa toppdomän oo way kala duwan tahay mid kale mid kale ayuu ka duwan yahay Qaarkood waxaa loo soo gaabiyaa tusaale; .*se – Iswedhan*, .*no – Norway* iyo waxii la mid ah. Boggaga ciwaanada oo Maamul degaanka iswedhishka mar walba waxay ku dhamaadan *.se* , sidan oo kale toppdomän: http://www.linkoping.se, http://www.mjolby.se

  Waxaa jira tusaale kuwan hoos oo la soo gaabiyey:
  - .net waxaa laga soo gaabiyey network.
  - .edu waxaa laga soo gaabiyey education
  - .gov waxaa laga soo gaabiyey government.
  - .info waxaa laga soo gaabiyey Information .
  - .org waxaa laga soo gaabiyey organization.

Sidan marka loo soo gaabiyo ma cada shayga ku jira ciwaanka bogga.

# Xiriiriyaha daalacaha

Waxaan eegaynaa google Chrome, maadaama uu yahay daalacaha ugu caanka ah



# Jeexa magaca

- Waxaa ka muuqda magaca barta internetka ee furan. Bidix ilaa midig, badhannadu waa **yaree, weynee** iyo **xir**.



# Jeexa cinwaanka

- Cinwaanka buuxa ee internetka ayaa la geliyaa bannaanka bidixda. Bannaanka midigtu waa bannaan raadin, kaasoo markan ku xiran matoorka raadinta ee Google.



# Liiska

Waxaa ku jira liisaska ugu muhiimsan.

Waxaa ku jira qalabka ugu muhiimsan: Daabaceyaasha, Bogga Koowaad, iwm.



# Loogu jecel yahay / la calaamadaystay

Qaybta loogu jecel yahay ayaa suurtogelisa in aad liis ku qorato isuxireyaal aad dhakhso ugu gaarto bogagga aad badanaa booqato.



Waxaad qarin kartaa aanad muujin kartaa jeexaha qalabka. Guji **liiska Eeg**, dooro Jeexaha qalabka, oo dooro jeexa qalabka aad rabto in aad qariso/muujiso. Calaamadda saxda ee jeexa hor taalla ayaa tilmaamaysa in jeexu muuqdo.



# Bogga koowaad

Fur Liiska, guji Gundhigyada

Tag Muuqaalka oo guji

Muuji badhanka bogga koowaad







Sanduuq hadal leh ayaa muuqanaya. garaac: *bogga internetka aad rabto in aad ka dhigato bogga koowaad.*

2 Guji **Qalabka**, dooro **Xulashooyinka Internetka**.







Geli cinwaanka buuxa (**URL**) ee barta internetka aad rabto in aad ka dhigato boggaaga koowaad (ku goobaaban casaan), ka dibna ka guji **OK** dhanka hoose ee sanduuqa hadal leh.

# Wax ku darista qaybta loogu jecel yahay iyo wax ka saarista qaybta loogu jecel yahay / La calaamadaystay

Guji xiddigta si aad bogga internetka ugu darto qaybta loogu jecel yahay



Ka saarista bog internet qaybta **Loogu jecel yahay**:

Ka fur qaybta **Loogu jecel yahay** jeexa liiska ama
adigoo isticmaalaya calaamadda **jeexa Loogu jecel yahay** (xiddig huruud ama jaalle ah). Tag bogga internetka aad rabto in aad ka saarto
liiska loogu jecel yahay. Midig ka guji bogga internetka oo dooro **Ka saar**.



# Masaxidda taariikhda daalaca iyo faylalka ku meelgaarka ah.

- Faylalka ku meelgaarka ah waxaa kumbiyuutarkaaga lagu kaydiyaa marka aad bogagga internetka booqato. Kuwani waxay yarayn karaan xawaaraha kumbiyuutarka, waxaana faylalka weliba loo isticmaali si loogu arko waxa ku jira kumbiyuutarkaaga. Tan ayay u fiican tahay in kolba mar la masaxo faylalka ku meelgaarka ah
- Fur Gundhigyada oo dooro Horreeya. Ka dib, qaybta Sirta iyo amniga, ka guji Bannee xogta daalaca.



Haddii aad calaamadda saxda geliso sanduuqa cagaaran ee sanduuqa hadal leh ee bidix ku yaalla: **Masax taariikhda daalaca marka la baxo**, waxay tani masaxi doontaa taariikhdaada daalaca marka aad kumbiyuutarkaaga xirto.




Haddii aad **Masax** ka gujiso sanduuqa hadal leh ee bidix ku yaalla, sanduuqa hadal leh ee hoose ayaa muuqanaya.




Calaamadee dhammaan sanduuqyada ka ifan sanduuqa hadal leh ee midig ku yaalla, ka dibna guji Ka saar.

Ka dib ka guji **OK** sanduuqa hadal leh ee kor ku xusan. Waxaad iminka masaxday taariikhdaada daalaca. Fadlan ogsoonow in aanay tani wax ka beddelayn liiskaaga loogu jecel yahay.

# Wax ka daabicidda baraha internetka

Marka aad Internetka daalacanayso ama dhex wareegayso, waxaa dhici karta in aad rabto in aad macluumaad daabacdo. Guji liiska oo dooro **Daabac...** Sanduuq hadal leh ayaa furmaya kaasoo laga helo dhowr xulasho oo la kala doorto.

Waxaad weliba dooran kartaa in aad qayb keliya ka daabacdo barta internetka. Dooro qaybta aad rabto in aad daabacdo adigoo xajinaya badhanka bidix ee doolliga oo dooranaya qoraalka aad rabto in aad daabacdo. Ka dib midig ka guji adigoo isticmaalaya doolliga oo dooro Daabac.



# Sida sawir looga kaydiyo bar internet

Dooro sawirka laga hadlayo, midig ka guji sawirka ka dibna dooro **Sawirka ku kaydi…** Sanduuq hadal leh oo cusub ayaa furmaya, eeg fareemka xiga



Dooro halka aad rabto in aad sawirka ku kaydiso, geli magaca sawirka, ka dib guji **Kaydi**.



# Adeegga Raadinta iyo Matoorrada Raadinta

- Waxaa jira dhowr matoor raadin/adeeg raadin oo kaladuwan oo aad isticmaali karto si aad Internetka macluumaad uga hesho. Adeegga loogu yaqaanno ee ugu caansan waa Google, laakiin waxaa weliba jira kuwo kale:

- **www.google.com**
- **www.yahoo.com**
- **www.altavista.com**
- **www.alltheweb.com**
- **www.hotbot.com**
- **www.lycos.com**

Geli waxa aad raabto in aad raadiso jeexa raadinta. Fareemyada soo socda waxaan kaga hadli doonnaa liisaska ku goobaaban casaan, A-H.



# A) Wax walba

Raadinta baraha internetka guud ahaan. Geli waxa aad raadinayso. Waxaa muuqanaya dhowr bog oo ay ku jiraan ereyo muhiiim ah (natiijooyinka raadinta). Guji mid ka mid ah cinwaannada internetka (magaca ayaa ku muuqda buluug oo hoos xarriiqan). Si aad dib ugu noqoto natiijooyinka oo dhan, guji badhanka Dib ee koonaha sare ee bidix kaga yaalla daalacahaaga.



# B) Sawirrada

Waxaa muuqanaya oo keliya natiijooyinka ereyada/weedhaha gaagaaban ee aad gelisay jeexa raadinta.

Matalan: *Ubax.* Waxaad sawir kaydin kartaa adigoo **doorta sawirka, midig gujiya**, doorta "Sawirka ku kaydi..." ka dibna doorta halka aad sawirka kaga kaydinayso kumbiyuutarkaaga.



# C) Maababka

Waxaad raadin kartaa goobo juqraafiyeed oo kaladuwan waxaanad eegi kartaa maababka. Waxaad isticmaali kartaa maababka qaarkood si aad u dhex maaxdo.



# D) Fiidiyowyada

Raadi fiidiyowyada ku xiran waxa aad raadinayso, matalan: *libaaxyo*



# E) Wararka

Waxaa hawshan lagu raadin karaa shay gaar ah oo wararka ku jira, matalan. Waxaad akhrin kartaa maqaallo buuxa adigoo doolliga ku gujiya wararka ugu door roon ee buluug ah.



# F) Dheeraad

Guji **Dheeraad** si aad u hesho xulashooyin dheeraad ah, eeg halkan hoose.



# H) Turjum

Loo isticmaalo si qoraal loogu kala turjumo labo luqadood



# G) Gmail

Akown iimayl samayso adigoo ka gujinaya **AKOWN SAMAYSO** google dhexdiisa.

